

Xasuusinta Xadidyada Toddobaadka Shaqada (WWL)

DULMARKA XADIDYADA TODDOBAADKA SHAQADA (WWL)

- WWL-kaaga waa tirada wadarta ee saacadaha adeega ee aad ku bixin karto toddobaadka shaqada (Axad ilaa Sabtida)
- Heerka caadiga ah waa afartan (40) saacadood oo adeeg-bixin toddobaadkii
- Waxaa laga yaabaa inaad shaqaynin in ka badan 40 saacadood toddobaadkii ilaa ay ogolaato CDWA
- Waa mas'uuliyaddaada inaad isku dheelitirto saacadaha macmiilka kuu qoondeeyay gudaha WWL-kaaga la ansixiyay
- Saacadaha adeeggu waxay ku xisaabtamayaan WWL, waxaana ku jira wakhtiga la qaatay adeeg-bixinta:
 - ♦ Daryeelka shakhsi ahaaneed
 - ♦ Daryeelka Nafisinta
 - ♦ Tababarka Helitaanka Xirfadaha
 - ♦ Adeegyada Nasashada
- Waqtiga maamulka, wakhtiga safarka iyo tababarka loo baahan yahay laguma xisaabinayo WWL-gaaga
- Haddii aad shaqaysay dhammaan saacadaha toddobaadka shaqada oo aad u baahan tahay inaad la joogto Macmiilka, raac tillaabooyinkan:
 - ♦ La joog macmiilka ilaa ay xaaladdu ka xasiloonaa oo ay ammaan noqoto
 - ♦ Haddii ay u baahan tahay Adeegyada Caafimaadka Degdegga ah, la xiriiir 9-1-1
 - ♦ Ka caawi macmiilkaaga habeynta caawin la heli karo marka caawinta koowaad la waayo
 - ♦ Dhamee maalintaada shaqada isla marka ay nabdoon tahay in sidaas aad sameeyso
 - ♦ La xidhiidh CDWA sida ugu dhakhsaha badan, ama ugu yaraan maalinta shaqada ee xigta, si aad uga warbixiso xaalada

JADWALAYNTA

- Macaamiishu waxay u dejistaan jadwalada shaqo si ku salaysan saacadaha iyo hawlhooda la ogolaaday
- Waa inaad kala shaqeysaa Macmiilka isbeddel kasta oo lagu sameenayo jadwalka, ma aha CDWA
- Waa inaad ogaysiisaa Macmiilkaaga haddii aanad awoodin inaad shaqeysa
- Imaansho la'aanta ama ka daahitaanka shaqada waxay keeni kartaa in Macmiilkaagu joojiyo shaqadaada
- Adiga iyo Macmiilka labadiinaba waxaad mas'uul ka tahiin la socodka saacadaha iyo hubinta saacadaha Macmiilka ee sida billaha ah loo oggolaaday in aan la dhaafin
- Waa mas'uuliyaddaada inaad isku dheelitirto tirada saacadaha laguugu qoondeeyay Macmiil kasta oo uu ku jiro WWL-ga lagu qoondeeyay
- Macaamiishu waxay ku meeleeaan saacado IP-yadooda, waxaadna awoodi doontaa inaad ka aragto nooca adeegga iyo saacadaha lagu oggolaaday bogga internetka ee DirectMyCare (DMC)
- Oggolaanshahaaga tababbarka ayaa sidoo kale ka muuqan doona bogga internetka ee DMC
- Macaamiisha waxaa lagu dhiirigelinayaa inay la sameeyaan qorshooyin gurmada ah oo ay la socdaan Maareeyayaashooda Kiiska, Macmiilkuna waa inuu isticmaalo qorshahan haddii IP-gu aanu si joogto ah u shaqayn karin saacadaha loo qorsheeyay
- Macmiilku waa inuu dib kuula eegaa qorshahooda kaydka ugu jira adiga
- Waqtiga Dheeraadka ee Aan La Ansixinin (Unapproved overtime, OT) ma ahan qorsho labaad oo jiri kara
- Wixii ah muuqaallada tilmaanta ee ku jira bogga internetka ee DMC, fadlan tag: <https://www.ConsumerDirectWA.com/IP-Resources/>

XADIDYADA TODDOBAADKA SHAQADA (WWL) EE KU MEEL GAADHKA AH

- Waxaa laga yaabaa inaad shaqeyso in ka badan 40 saacadood todobaadkii haddii lagu siiyo WWL sare si aad u taageerto baahiyaha caafimaadka iyo badbaadada Macmiilka, oo ay ku jiraan:
 - ♦ Yaraan shaha xooga-shaqada
 - ♦ Baahiyaha caafimaadka iyo badbaadada ee Macmiilka
 - ♦ Khatarta macmiilka ee uu ugu jiro inuu galo gacan hay'ad
- Codsiyada waa in aad adigu ku sameysaa ama macmiilkaagu ku sameeyaa si toos ah Iskuduwayaasha Adeegga ee CDWA
- Haddii aad ka badiso WWL ku meel gaadhka ah ee laguu ansixiyay, waxa laga yaabaa in lagugu qaado tallaabo anshaxeed, ilaa iyo oo ayna ku jirto joojinta shaqada

XADIDYADA TODDOBAADKA SHAQADA (WWL) EE JOOGTADA AH

- Sida ku cad RCW 74.39A.525(4)(a), CDWA waxay kuu ogolaan kartaa inaad shaqeyso in ka badan 40 saacadood todobaadkii, marka ay kuu dejiyo DSHS.
- WWL-yada joogtada ah ayaa u jiri doonaa wakhti nololeedka shaqo ee IP-ga waxaana lagu xaqiijiyaa iyadoo la adeegsanayo xogta DSHS
- Haddii aad ka badiso WWL-gaaga joogtada ah ee laguu oggolaaday, waxaa laga yaabaa in lagugu qaado tallaabo anshaxeed, illaa iyo oo ayna ku jiri karto shaqo ka joojin

Su'aalo miyaad qabtaa? **Fadlan nala soo Xidhiidh maanta!**



InfoCDWA@ConsumerDirectCare.com



866.214.9899

Sidee ku ogaan kartaa wax badan oo ku saabsan CDE?

Ka hel wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan CDE ama **www.ConsumerDirectWA.com**

SHABAKADDA DARYEELKA MACMIILKA



TOOSKA AH EE WASHINGTON

20220215